Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
GolahaShacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kal.8-aad kul.11-aad **19/05/2016**

Kalfadhiga 8-aad
Kulankiisa11-aad Saac.fur.11:39gh.Saac.Xir.4:45gd.
Guntinta(Quorum) 158Xildh.
Ajendaha:-

1. **Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **Qaybinta , akhrinta iyo ansaxinta sharciga suurta gelinta doorashada dadban 2016.**
4. **Qaybinta , akhrinta iyo ansaxinta sharciga lagu fulinaayo doorashada dadban 2016ka**

1.Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan (Jawaari).

2.waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Muxammad Sheekh Cusmaan Jawaari ,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah ,uuna akhriyey habdhowre Xildhibaan C/llaahi Xasan.

3.Guddoomiye Jawaari,wuxuu sheegay in Ajendaha uu ka koobanyahay Afar qodob Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah ,Ansaxinta Ajendaha ,Qaybinta Akhrinta iyo Ansaxinta Sharciga Suurta gelinta doorashada dadban 2016ka iyo Qaybinta iyo Akhrinta Sharciga lagu fulinaayo doorashada dadban 2016ka .

Kadib ,wuxuu u yeeray habdhowre Xildhibaan Maxamed Cumar (Macalow), si uu u akhriyo Ajendaha 3-aad qaybinta ,akhrinta iyo ansaxinta shraciga suurta gelinta doorashada dadban 2016ka.

Habdhowre Xildh. Maxamed Cumar (Macalow) wuxuu akhriyey sharciga suurata gelinta doorashada dadban 2016.

Xildh.Fadhayo,(point of Order),wuxuu sheegay documentiga golaha la keenay uu aad u wanaagsanyahay laakiin uu codsadey in la keeno oo lagu soo xiro documentiga Magaca Odayaal dhaqameedyada ee 135 ahaa,kadibna loo codeeyo oo la ansaxiyo.

4.Guddoomiye Jawaari, wuxuu sheegay in shaqada maanta loo gelayo sida soo scota ,xoghaynta wuxuu ku amrey in la qeybiyo documentiga ku qoran 135 odey dhaqameyd ee Soomaaliya, waxaa is **qoray 56** xubnood oo dooda ka qeybqaadaneysa ,markey bilaabato dooda ilaa ay ka dhamaato in uusan jirin

xildhibaan bixikara. Waa qodob Dastuuri ah in Madax-weynaha JFS Mudane Xasan Sheekh Maxamuud wuxuu codsadey in uu golaha qodbad ka jeediyo. Wuxuuna amrey Guddoomiye Jawaari in loo yeero lana soo dhaweeyo Madax-weynaha JFS.

5.Guddoomiye Jawaari ,wuxuu soo dhaweeyey **Madax-weynaha JFS.Mudane Xasan Sheekh Maxamuud** wuxuuna ku yiri,Mudane Madax-weyne ku soo dhawoow kalfadhiga 8-aad kulankiisa 11-aad ee Golaha Baarlamanka JFS.maanta hadal jeedinta Madax-weynaha ka sokow Ajendooyin aad iyo aad muhiim u ah kuna saabsan khrinta Qodobada na horyaala,uu yahay,qeybinta ,akhrinta iyo ansainta Sharciga Suurta gelinta doorashada dadban 2016-ka iyo qeybinta ,akhrinta iyo Ansixinta Sharciga lagu fulinaayo doorashada dadban 2016-ka .labada sharci oo laga soo dhexsaarey Barnaamijka Sharci bishii April 2016-ka ,sida ay noogu suurtagasho,Golaha Wasiirada iyo Golaha Shacabka ay isku raaceyn in aan la gelikarin doorasho toos ah . Sidaasdarteed, Mudane Madax-weyne sida uu Dastuurka ogolyahay in aad Golaha u jeediso khudbad.

Mudane ,Madax-weyne ku soo dhawoow

6.Madax-weyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa halkaas khudbad ka soo jeediyey ,wuxuuna hadalkiisa ku bilaabey ,Mudane Guddoomiye aad iyo aad ayaad ugu mahadsantahay Xildhibaanaduna waa mahadsanyihiin ,fursad weeye in aan maanta soo horistaago Golaha Baarlamanka JFS. Si aan umuurihii dalka iyo siyaasadda wax ugu iraahdo ,tabashooyin qaar aan wax isaga sheego .waxaan rabaa ayuu yiri, Baarlamanka sharafta leh waqti waxaan mareynaa aad xasaasi u ah aan u baahannahay waxbadan in aan ka midowno iyo in dabacsanaan ka muujino .Dalkaan taariikhdiisa iyo siyaasadiisa way socotaa waxay soo martey iyo beri meesha ay u socoto maalinba maalinta ka danbeysa waa la sii hagaajinayaa waana sii ballaaraneysaa. Maalmihii la soo dhaafay waxaan dhageysanaayey ayuu yiri , dareenka xildhibaanada Baarlamanka JFS. ay ka qabaan arrimaha doorashooyinka, waxbadan oo dareenkooda ka mid ah waa dareyn sax ah uu qabikaro qof markuu mas'uul yahay oo matalaayo oo wakiil ka yahay daddhan in uu dareemada noocaas ah iyo feejiknaan noocaas ah in uu qabo sax weeye, waana waajibaadka Baarlamanka saaran ayuu ka mid yahay qof xildhibaan ah intaba. Wuxuu yiri aniga cabsho aan ka muujinaayo dareenka dadka uu qabo ay ka hadlayaan ayan ka turjumayaa.

Haddana walaalayaal, waxa aan wadno waa masiirka Ummadda,mararka qaarkood go'aano adag in aad aqbasho ama aad qaadato,waxaan u maleynayaa mas'uuliyadda ugu weyn ay ku jirto .Baarlamanka Federaalka soomaaliya wuxuu matalayaa shacabka Soomaaliyeed ,Qaranka Soomaaliyeed ayuu mas'uul ka yahay ,dowladnimadda iyo Qarannimadda meeshii ay tiiley oo u aheyd mambac Qaranka waaye.Mararka Qaarkood waxaan u baahananahay anagoo og dadka iyo deegaanadda aan kasoo jeedno sida ay yihiin iyo waxa ay tabanayaan iyo xanuunkii hore ee la soo marey iyo waaya aragnimadii waxyaabo badan weli in ay ku dheganyihiin dhamaanteyn xanuunkii aan soo wada marney haddana, halkaan waxaan ku soo gaarney inaan tanasulaad ka soo sameyno dulqaadinaan kasoo suubinay inaan mustaqbalka iyo waxbadan rajada badan aan ku xirnay shalay inaan la noolaanin ee bari ku noolaano ee bari hiigsano waaye waxa aan meeshan ku soo gaarnay , kumaynaan soo gaarin in shalay aan ku dhagagnaano wixii dhacay hadii aan ku dhaganaano maanta ma'aynaan soo gaarnayn.

Maantana haddii aan ku dhaganaano bari ayaanan gaaraynin ,addunyada waa seddex shalay oo lasoo dhaafay,maanta oo aan joogno iyo biri , shalay waa naa soo dhaftay noo soo noqonmeyso,midna waa wax ka qadasho iyo wax ka barasho ayey leeadahay ,maatana waxay ledahay wixii shalay dhacay dhib ka badnaa in aan ka gudubno, ka tagno ,ka tanaasulno ayey ledahay ,wixii wanagsanaa ee shalay noo qabsoomay inaan ku cel-celino sii hagajino oo sii qurxino ayey leedahay, manta midda labaad ay leedahay waxay tahay inaan u diyargarowno biri,hadana wixii shalay naga qaldoomay aanan maanta naga qaldamin. waxaan markale rabaa Xil.anoo og inay garanayaan hadana inaan ku sii dhiiragaliyo kuna sii bogaadiyo ,waan garanayaa idiin ka mid ayaan ahey,waan idinka wadaaga xanuunkii shalay wixii qaaladamay shalay wixii naga xumadey shalay kulli waan wada ognahay, maantaan joognaa,waxaan ku soo gaarnay maanta waxbadan wixii shalay qaldamay ama naga xumaday oo aan ka soo gudubnay ka soo gulaysanay tanasul ka mujinay . halkaan ka nimad maanta wixii qaadiyad oo naga dhiman inaan haddana ku dhiirano aan horena uga sii socono. Arrinta ee 2016, waxyaabo mabaadi waaweyn oo culus horey ugu soo doodnay aan islagaranay ayaa jira oo u baahan iyaga nafsadooda u baahan in aan dhowrno. waxaan hore is la soo garanay sababta wax kastaba ha ahaatee ee 2016 in aan dhicikarin **dorashada hal qof iyo hal cod ah**, laakiin doorashada ay dhacdo **doorashada dadban ah** ,waan iska soo raacnay,waan ka soo doodnay siyabo badan ayaan u soo racnay ,waan is la soo qaadaney intaas,waxaan is la soo qaadanay uu baarlamaanku aad iyo aad ayaan uga mahadsanyahay xiligeedi inay wax dib u dhicid ah aanan jiridoonin kaliya taa in aan helno baarlamanka hore uu waqtigiisa dhamaado baarlamanka cusub uu yimado ,2-dii mabd'a oo waawayn markaan isla qaadaney kadib,waxaa ka soo haray waa wixii u suurta gelinaayo arintaa in ay dhacaan oo xaqiiqo noqdaan wixii noo suurtagelinaayo waaye . wixii aan hore isla garanay waxba ma aynan dhimin ,laakiin miyi iyo maqaalo iyo masuuliyad la qaadano oo u taagan yahay oo dalkii la riixaayo oo hore loo wada in dadka soomaliyeed noo fahmaan caalamkana uu sida u garto . Wax badan oo soomaali ka xir-xirnaa ayey ka barbarteen oo dadka gudaha inay wax cusub ay maqlayaan oo raja ahna way soo socotaa wada arkeysaan meesha aan joognay iyo masuuliyada an haynay loo soo wada is tagay oo nagula hestaa ay leeyihiin maya markaan anaga qabaneyno ,qofna rajo ma soo galilaheyn oo ma dhihilaheyn Madax-weyne ayaan rabaa inaan noqdo, xildhibaan ayaan rabaa In aan noqodo, Aqalka sare ayaan rabaa in aan galo .waxa saas u dhacayaan anaga ayaa abuurnay ,waan arkeynaa maanta dalkeyna rajadaas ayaa kuwada jirta, intaas ayaa u taagan xildhibaan ,Guddoomiye Baarlaman u taagan oo leh fursadeyna ayaa timid ,waqtigayna ayaan qaadaneynaa , laakiin waxaan rabnaaa sida ugu saxsan ugu macqulsan oo ugu wanaagsan maanta wax nooga dhici karaan in ay wax noogu dhicikaraan,anagoo intaasoo dhan wada og waxbadan ayey nagu qaadatey,waxaan baarlamanka ka codsanaynaa waqtiga waa nala jiraa nalamana jiro horeyna waataan go'aan u soo gaarney oo aan dhahney wax walba waqtigooda haku dhacayn , go'aanka aan ka gaarnay haddey dhab naga tahay waqtigaas wax walbo dib loogu riixno aan ka adkeysano oo ka socono horeyna aan ugu socono .tan 2-aad,adduunyo waa qabyo dadka reer baadiyuhu waxay yirahdeed rati 3-haamood saarantahay oo waa dheelinayaa inta reer magaalka ah oo noloshooda baadiyaha aheyn ha iiga raali ahaadeyn,oo haanto 4-aad ka maqantahay. marwaliba waa dheelinnayaa dadka reer magalka ah noolashooda aan baadiyaha aheyn ha raali ahadeen marwalbana wax dhameystirana ma jiraan ,qabyo dhamaystir ayey leedahay la joogaayoo la saxaayo wixii maanta noo suurtagal aan wada qabano oo aan ku mideysnaano ,aan qurxino wixii maanta naga qaldamay in aan beri wax qurxino qaybaha dhiman aan dhameystirno.

Go’ aan oo aan hore ugaarnay oo ah doorashada 2016 oo ka horeeysey oo aan sameyney oo dhan waxay ku egyihiin 2016. 2016 ilaa 2020 kaas waa mashruuc kale marka wixii aan is la garaney waxay ku dhamaa anayaan maalmo xadidan oo ay fursad kale noo furantahay , aan saxno oo wixii na anfacayana horey u sii wadno wixii aan na anfaceynin dib isaga dhigno fursadas way farantahay waana ka wada heshiinay waan isku racnay fursadasi way furantahay, soomaali ay u furantahay mawaadhinka fursadaan ay frantahay ,cidii markaasi joogta ayey masuliyada sarantahay lagana lahayn iyo dustuurka in aan dib u saxno ayaa nalaga rabaa ,wax kasta oo dastuurka ku yalay waxa maanta aan rabaa in an sameyno ,si aan wax sharciyeysan oo dowlada federalka, intaas jeer ayaan sheegnay fikrado badan 2016 sidii loogu gudbilahaa. Dowladnimo ayaan ka shaqeyneynaa in wax kasta ay sharci noqodaan, sharciyada ka tirsanadaan ayaan rabaa ayuu yiri , sharciyada meeshii laga soo doonayana waa halkan waxaan codsanayaa oo barlaman ka codsanayaa inaan naladhihin masajidka aan u cararno oo masaajidka qeylo ka yertay , oo barlamanka ka yertay in ayan noqon dadka banan ka jooga masuliyiinta kale dowlada Goboledka leh, barlamanka leh iyo xukumadda qeylo haka soo yerto aan isla celcelino wada tashi&sharci &nidaam aan ku toosino laakiin haddii qeylada xageena ka timaado oo ka yeerto xoogaa way dhib badnaaneysaa. waxaan ka codsanayaa anigoo ku hadlayo magaca madax-weynaha J F S ee dowlada Federaalka Soomaaliya Baarlamanka waxan ka codsanayaa sharci maanta horyal, waqtiga waan isla qaan doona waan ansaxina doonaa,haddii ,Alle yiraahdo,waxaan maanta aan idin hor imid waxay tahay in aan iska dhaafno dareenka caadhifada ah faragelin ayaa nalagu hayaa, haddaan hadda tashan weyno wixii awood aan leenahay aan sameyn weyno faragelin iyo in naloo taliyo horimayno ,hadda aan tashan weyno waa naloo talinayaa,xuraan nahay kaligeen oo baarlamanka dhex fadhino,Guddomiyaha, Madax-weynahii, R/wasaarihii waan isla joognaa cid maanta naga maqan oo banaanka jirto u yeraneyno ma jirto howl aqaran aan ugu yeraneyno maanta nagama maqno waan wada joognaa ayuu yiri, wixii maanta naga soo baxay muuqalka maanta naga soo baxay shacabka soomaliyeed arkaan in ay maanta guryahooda ka soo baxay ay bananka taaganyihiin beesha caalamka awoodii ugu sareysay aheyd Golaha Amaanka ee Jamciyadda Quruumaha ay maanta xamar ku shirayaan ,maanta waa maalin taariikhi ah oo ka qormeysa waaye, aan xoogaa yar dib u riixno oo si shaqsi ah nooga dhaxeyso ,maanta dib aan u rixno dib aan u dhigno muqaalka aan soo aburnay ,beryahaan danbe dalka aan hore u dhismo. 2016-ka waqtigiisa lamadhafayo inan taa muujino calaamad su’aal weyn saarin madaxa korkiisa yaanan iska saarin dadka soomaliyeed iyo caalamka oo dhan dad ka surtowdo wixii shalay yirahdeen in ay ka noqdaan oo 2-tilaabo in ay hore u qadaano, 3-tilaabo gadaal u noqono dad ay ka surtowdo in aan noqono ayaan rabaa, fursadaan ayaan lenahay wixii qaldana ayan saxeynaa, heleysaan aan leenahay in aan kala qadano ,waan kala jidaneynaa waan kala qeybineynaa waan kala kasbaneynaa haddii sidaas aan yeeliweyno waxa kale inoo furan maxay tahay, inay cid kale noo timaado ogow waa naloo kala qeyb qeybiyaa waana dhici jirtey aad iyo aad waxaan idinka codsanayaa in xusustiina dib ugu noqotaan weyna dhici jirtay Markaan wax qeybsan weyno waa naloo qeybinjiray , markaan Heshiin weyno waana nala heshiinsiin jiray, Markaan anaga kalegeen heshiinana waxaa noo soo jiidanjirtay sharaf iyo karaamo,Maanta sharafta iyo karaamada ayey joogtaa Yaanan aadin wadadaa wada aan ahayn,aniga oo aad iyo aad ugu xanuunsan dad yowga qaarkiis,xildhibaanada oo tabanaayo,Beelaha Soomaaliyeed laakiin gacmaha maalin midbaa la barkadaaye maalinkasto qofbaa dareenkiisa in uu nooga tanasulaa ayaan ku soo barkanaynay aan ku soo socnay oo halkaan ku soo gaarnay ,weli waxaan codsanayaa walaalaha dareenkaas qabo waana addreesgareyneynaa inta karaankayna ah maanta wixii aan

qabanweyno beri ayaan qabaneynaa Inshaa Allah .haddii sidaan aan ku jirno beri wax qabanmeyno maantana wax qabanmeyno waxaan codsanayaa inaan horey u socono go'aano adadag ayaan horey u soo gaarney maantana xoogaa yar inaan qumbacno oo aan hoos u degno oo aan qaadano .Dadka tabashada qaba dhulka Soomaaliya qeybahada kal duwan waxaan diyaar u nahay in aan idiinla tagno oo aan idiinla qancino,dhageysano ,aan u sheegno asbaabta waxa ay dhibsadeyn nagu kalifey in aan qaadano ay nalaqaadanayaan waan hubaa inay nala qaadanayaan markii ay dhegeystaan.anagoo garowsho badan ka muujineyno waxa ay qabaan .laakiin mas'uuliyadii gurigaan ku dhexfadhino inta naga maqan waaba nagamaqantahay maanta meeshaan aan ku dhex fadhino Soomaaliya inta mas'uulka ka aheyd codka qarannimada iyo dowladnimadda heysatey ee Soomaaliya waa intaan, waxa naga maqan waa mas'uuliyad qeyb Soomaaliya kamid haysataan mas'uul ka saaranyahay ayaa naga maqan.ama xilgaar oo hoose ka saaranyahay ayaa nagamaqan.qaranka Soomaaliyeed iyo dowladda Soomaaliya la yiraahdo Madaxeyne ,Ra'iisul Wasaare ,Wasiir ,iyo Xildhibaan gurigaaan maanta ayey dhex fadhiyaan, taladii maanta na geftaa waa talo qofkale aan nooga maqneyn oo aan lala sugeyn.

Aad iyo aad ayaan markale u codsanayaa 2-daa xeer oo meesha taal uu guddoomiyaha ka SShadda ka hadlayey oo xukuumadda u soo baasgareysey Baaralamaanka guddi u saarey intaas maalmood guddigii intuu ged-gediyey meel walba ka hadley qod-qod inta u qaadey laysku qabsadey si uun inta laysku qanciyey meeshaan maanta qoraala uu taaganyahay meel ka roon inta la soo waayey ,wakiilna idiinka ahaayeen Baarlamankaa magacaabey anagana waan la shaqeney waan u tagney , wixii naga qancikaro iyo wixii lagu kordhin karo waan ku kordhinay waxbaan ka wadnaa .Maanta guriga waxaan ku joognaa guddigii aad shalay magacaabateyn,Xukuumadii ,Madax-weynihii iyo Guddoomiyaha Baarlamanka , waan isla wadnaa waana idiin keeney ,haddaan keligeyna ku filanahay waan dhameysaney waa dhamaatey intaan idiin niraahdo ayaan halkaas ka bixi lahayn ,muhiimadda aad leedihiin waxay tahay wixii intaas aan ka soo doodney oo aan isla soo garaney oo aan isku soo jii-jiidney oo aan soo qaadnoo idiin keenay ,sharaf ayeey noo tahay idinkana shara ayeey idiin tahay ,ummadda Soomaaliyeedna sharaf ayeey u tahay, **HAY'AD SHARCI DEJIN AYEY LEEDAHAY OO AAN TALADA QARAN LAGU DHINAC MARI KARIN OO AAN LOOGA MAARMIN , IN AAN AKHRINO WAAYE MUUQAALKA NOOCAAS .** Waan idiin keenay waana daba soconaa waan idiin nimid codsigeynana waxaan ku dareynaa in aad naga aqbashaan sid ay tahay aad nooga aqbashaan ,wixii dhiman oo in laga hadlo u baahan in laga wada hadlo weli waa noo sii furantahay maanta kuma eka wax walba ,Baarlamaankana kuma eka waa joogayaa wuuna joogayaa ilaa Baarlamaan kale subax danbe soo fariisanaayo waa joogayaa.Adduunyo maanta kuma eka waaqti badan ayaa noo dhiman, Soomaaliyana waxaa u sii dhiman waqti kale oo dheer safarka ay ku jirtaa iyo qayaanka ay sii qaado ,markale waan idiin mahadcelinayaa guddoonka fursadaan markale ay na siiyeen inaan markale Baarlamanka Federaalka Soomaaliya soo hor istaago.hadal jeedinteyda maanta intaas ayey ku koobantahay.

Ka dib waxaa bilaabatey doodii xildhibaanadda :

7. **Xil.Ridwaan:** wuxuu sheeagay in arinta maanta loo fadhiya inay tahay arin masiiri ah,in la isku yimaado kaliya maaha waxaa iyaga loo keenay sharci doorasho oo ah qodob sharci dastuurka ka imaaday, lalidda ama wax ka badalka dastuurka doorashada in dib loo dhigo waxba kama qabo intaas bilood gacanta ayay ku hayeen in maanta la yiraahdo wax dhibaato u keenayo ummadda soomaliyeed

maaha. (International community)in loo yeelo hadii la'an sixin waayo. Maxay tahay sababta loo bur-burinaayo dastuurka ummadda soomaaliyeed, agendaha oo loo soo qoray qeybinya nama-qabato.

9.Guddoomiye Jawaari, wuxuu sheegay in guddi loo saaray waxay soo qorena ay idin horyaaliin. Guddomiyaha wuxuu soo jeediyay in biririf la qaato, mudda biririfa ka dib waxaa dib u bilaawday doodi.

10.Guddomiyaha wuxuu sheegay in xeerkan lixda (6) qodob ka kooban yahay. 28Julay 2015 kii ,waxaad ansaxisey in uusan dhicikarin doorasho hal qof iyo hal cod. Xeerkaan wuxuu ka hadlaya Aug.2016 in ay dhacdo doorasho dadban,Dastuurka doorasho dadban kuma cadda ,balse doorasho dadban waa inay dhacdaa.

Xildh.C/llaahi Goodax Barre-point of order 60 Xildh. Oo halbeel ayaa ka maqan wuxuu soo jeediyay in loo yeero Xildh.

Xildh.C/llaahi Coonka, Guddomiye jawaari doorashada ma dhicidoontaa ama maya

Xildh.Cabdi C/llaahi, mahadcelin inaan wax ka iraahdo jadwalka.

Guddomiye jawaari,wali lama gaarin arrinta aad_____

Xildh.Khadiijo Maxamed Diiriye, waxay sheegtey **in** 19 bisha May 2016-Ka uu ugu hadlaayo waa maalin taariikhi ah, wixii halkaan ka dhacaaya muhiimada uu leeyahy kulankaan. **Bisha juun hal qof iyo hal cod** taas ayaa keentay Guddi siyaasadeed.Daw JFS Gud.Siyaasad Garwadeenka ahaa,taas oo kadhalatay in aysan doorashada wadanka aan ka dhicidoonin ,Guddonka iyo Guddiga waxay go'aansadeyn in la horgeeyo Baarlamanka Federaalka Soomaaliya, madasha waxaa u matalaayey Baarlamanka Professor Jawaari.

Xildh. Daahir Amiin Jeesow,wuxuu sheegay in Qod. 2-aad faqr.1-aad ee nadaamka doorashada dadban ah uu soo jeediyey in laga saaro ,kadibna la ansaxiyo.

Xildh.Shuuriye,wuxuu sheegay in wixii cabsho ah laysla wada saxo ,laakiin Golaha Shacabka ay wax isla gartaan taas oo sharaf u ah Golaha ,dabadeedna la ansaxiyo.

Xildh.Ubax Tahliil,waxay soo jeedisey in qoraalka lagu caddeeyo maalinta Xildhibaanka waqtigiisa ku eg yahay oo ah 20 Augosto 2016ka.

Xildh.Cusmaan Xaaji,wuxuu sheegay in sharcigaan ansaxinta doorashada dadban ,waxaa shaki laga qabaa Qod. 72-aad oo ku saabsan Aqalka Sare, wuxuu soo jeediyey in 5-ta qodob oo kale la aqbalo qodobka ka hadlaaya dib loo dhigo.

Xildh. Ciise Wehliye Maalin ,wuxuu sheegay in Qodobadda laysku heysto dib loo dhigo oo Baarlamanka 10-aad loo daayo in uu ansaxiyo ,wuxuu soo jeediyey inta qilaafka ku jirin la ansaxiyo.

Xildh. C/llaahi Jaamac,wuxuu sheegay in Xildh. Khadiija Maxamed Diiriye,uu ku raacsanahay ,wuxuu ka mid ahaa guddigii loo xilsaarey arrinkaa muddo dhowr maalmoodna ay ka shaqeynaayeen ,wuxuu soo jeediyey in Xildhibaanada ay ansaxiyaan oo laga tago shuruucda dhisan.

Xildh.Tahliil,wuxuu sheegay in 135-ta odey ee Baarlamanka la keenay ee arrintaa ay concern ka qabaan,arrinta Aqalka sare ay sababeyso in dhibkii 1992kii dhacay dib loogu noqdo waxaa lagu xaqiray beesha shanaad.

Xildh. Goodir Wuxuu sheegay in doorashadii tooska aheyd ay dhacdo 2020-ka ,mida dadbanna ay dhacdo 2016ka ,wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo midda dadban ,wixii khilaaf ka jirana dib loo dhigo sida aqalka sare.

Xildh. Maxamed Cumar Dhalxa ,wuxuu sheegay in iyagoo tixgelinaaya hadalka Madax-weynaha JFS,hadana waxaa meeshaan yaala heshiis la rabo in sharci loo bedelo ,heshiiskaan wuxuu taabanayaa qod. Dastuuri ah ,Aqalka Sare waa fitno wax uu ku saleysanyahay ma jirto haddey ahaan laheyd 4.5 ama Qabiil ama Gobol intaba ,wuxuu soo jeediyey in dib loogu noqdo sharcigaan Aqalka Sare,beesha Caalamkana naguma qasbikarto wax xaqdaro ah oo Soomaaliya isku leyneyso.

Xildh. Maxamed Xirsi Ducaale ,wuxuu sheegay in ay tahay in maanta go'aan golaha ka gaaro ay waajib tahay inta macquulka ah ee doorashada dadban la qaato ,inta qilaafka ka jirana uu soo jeediyey in dob loo dhigo.

Xildh. Daahir Amiin Jeesow (point of order),wuxuu sheegay Aqalka Sare qaabkii iyo shuruucdii kula shaqeyn lahaa Aqalka Hoose ma degsana ,wuxuu soo jeediyey in howshaas dib loo dhigo sababtoo ah 6-qodob oo la rabo in la ansaxiyo halaga reebo .qod.2-aad Farq.1-aad, inta kale wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo.

Xildh. Saaqo,waxay soo jeedisey in qod.dooda laga qabo layska reebo inta kalena la saxiixo oo la aqbalo oo ah doorashada dadban.

Xildh. Caasha-Koos,waxay sheegtey in ay diidantahay cadaalad darida aqalka Sare lagu qeybiyey,waxay soo jeedisey in inta kale la ansaxiyo.

Xildh. Cabdibarre Yuusuf Jibriil,wuxuu soo jeediyey in doorashada dadba la ansaxiyo ,dibna loo dhigo Aqalka Sare ee muranka ka taaganyahay.

Xildh. Cabdi-risaaq,wuxuu sheegay madaama la ogol yahay doorashada dadban in la ansaxiyo ,halka cadaala darada aqalka sare ,wuxuu soo jeediyey in dib loo dhigo oo looga hadlo.

Xildh.Maxamed Iidle Geedi ,wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo doorashada dadban 2016ka ,wixii khilaaf ah oo aqalka sare ah dib loo dhigo.

Xildh. Naciimo Gacal. Waxay sheegtey in Aqalka sare dib loo dhigo waayo wax dhaqaala ah looma haayo cid bixineysana hadda la haayana ma jirto .waxay soo jeedisey in la ansaxiyo doorashada dadban ee 2016-ka .

Xildh. C/laahi Goodax Barre, wuxuu sheegay in Dastuurka waxa Golaha Baarlamanka loo horkeenay in la saxo,wuxuu soo jeediyey in isbedel lagu sameeyo ,haddii si duuduub ah uu guddoonka cod u gelinaayo waxaa laga saarayaa qodobka la diidanyahay.

Xildh. Axmed Ducaale Xeef,wuxuu sheegay in danahooda iyaga iska leeyihiin beesha caalamkana ay ogaato, Aqalka Sare qoraalka laga saaro ,inta kalena la ansaxiyo.

Xildh**. Xiis cawl,**wuxuu sheegay in Aqalka sare uunan caddeyn dood bandanna waa laga qabaa ,wuxuu soo jeediyey in dib loo dhigo ,inta kalena la ansaxiyo.

Xildh. Bishaar Ugaas ,wuxuu soo jeediyey in Aqalka sare lagu saleeyo Caddaalad oo dib loo dhigo si Golaha u ansaxiyo doorashada dadban 2016-ka .

Xildh.Cusmaan Dhuubow,wuxuu sheegay in Aqalka sare ee keliya aynan aheyn cadaaladarida ee aqalka hoose beelo ka maqan ayaa jira ,wuxuu soo jeediyey in taa laga hadlo.

Xildh.Afaraale,wuxuu soo jeediyey in doorashada dadban la ansaxiyo ,lagana saaro qod. Aqaalka sare.

Xildh. Cabdiqadir Cosoble,wuxuu soo jeediyey in qodobka 4-aad meesha laga saaro,aqalka sarana 4.5 halgu qeybsado ,waxa aan garaneynin dib hanaloogu dhigo.

Xildh. Xaaji Cabdi,wuxuu sheegay in xildhibaanada Baarlamanka uu dirsadey aan loo dirsanin goormaa ay doorashooyin dhacaysa 3-sano gudahood ayaa waxaa lasoo marey iyadoo la magacaabey 3-xukuumadood.wuxuu intaa ku darey in daakhilaga iyaga leeyihiin .Aqalka Sare iyo Aqalka hoose side y isku waafaqayaan.wuxuu codsade in hanta haroorkeeda maanta la gelin.Dalka Kenya weli waxay ku jiraan Dastuur qabya ah.

Xildh. Shariif Cabdala ,wuxuu sheegay in 2-da sharci uu guddoonka ka soo shaqeeyey ,mana dhicikarto bisha Augosto 2016-ka .Arrinta Aqalka Sare waa mid dood ka taagantahay dib haloo saxo.

Xildh. Samiiro Xasan ,waxay sheegtey in Xidhibaanada oo dhan ay ka hadleyn qodka .2-aad ee qoraalka aqalka sare ,waxaa farxad ah in 90% xildhibaanadda ay is waafaqsayihiin .waxay soo jeedisey in doorashada dadban loo codeeyo,dibna loo dhigo Aqalka Sare oo khilaafku ka jiro

Xildh. Faarax Cawad ,wuxuu soo jeediyey in sharcigaan la ansaxiyo .

Xildh.Sahro Qoorsheel,waxay sheegtey in maanta taladooda ay ku jirto in la qabto doorasho dadban waxay soo jeedisey in sharcigaan la geliyo cod oo la ansaxiyo ,mana qabo in aqalka sare meesha laga saaro .

Xildh. Khaliif ,wuxuu sheegay in Guddoomiyaha aad ugu dadaaley in la keeno sharcigaan ,qod.2-aad ee sharcigaan uu ka shakisanyahay .wuxuu soo jeediyey in qodobadaan 6-ah dib loo dhigo,haddii kale laga saaro qod.2-aad si khilaafka loo yareeyo.

Xildh. Maxamuud Macallin Yaxye, wuxuu sheegay in baarlamanka horey go'aan u gaarey in doorasho la'aado wax khilaaf ah kama taagno ,laakiin waxaa jirta cadaaladaro baahsan.wuxuu soo jeediyey in ay u tanasulaan ummadda Soomaaliyeed oo la ansaxiyo sharcigaan.

Xildh.Axmed Aadan Axmed,wuxuu sheegay in Aqalka sare aan hadda lagu soo darin ay horey u jirtey,dibna loo eego marxaladda maanta lagu jiro .wuxuu soo jeediyey in sharcigaan la siidaayo oo la ansaxiyo ,lana galo wixii dood iyo faaqidaad dalka iyo dadka.

Xildh.C/casiis Sheekh Yuusuf,wuxuu sheegay siiqada halkaan ku qoran ay tahay in Baarlamanka uu kala jabo wax qajajac ahna la ansaxiyo,Baarlamanka wuxuu diidanyahay Aqlka sare markii loo fiiriyo xag cadaaladeed.Doorashada waxay noqoneysaa mid dadban meesha aay ka aheyd mid toos ah, gacanmaroojis iyo cagajugleyn ayaa ka muuqata ,haddi xitaa qod.2-aad laga bedelo.

Xildh. Cabdikaafi ,wuxuu weydiiyey waxa ay ugu hadli la'yihiin guddigii soo diyaariyey iyo guddoonka wuxuu soo jeediyey in guddigii golaha matalaayey maxay ka dhaheyn arrinkaan waa inay sheegaan Madax-weynaha wuxuu naga codsadey in la meel-mariyo .wuxuu soo jeedyey in qod.2-aad laga saaro oo la ansaxiyo.

Xildh. Maxamed C/llaahi Geesey,wuxuu sheegay in uu u mahadcelinaayo shaqaalaha Baarlamanka oo aan qaadan muddo wax mushahaar ah haddana shaqeynaya,shacabka waxay ka cabanayaan aqalka sare.wuxuu soo jeediyey in shacabkaan aan loo celin meesha uu ka yimid ,yaana la kala saarsaarin dadka waxay ogolyihiin in laysku darsamo waxna laysla qeybsado .5-ta qodobna cod la geliyo oo qod.2-aadna laga tago .

Xildh.Maxamed C/llahi Fadhayo,wuxuu sheegay,in ay u fadhiyaan Golaha wixii ay soo diyaariyeen guddigii loo xilsaarey sharcigaan doorashada dadban,wuxuu soo jeediyey in la sii daayo qod.72-aad ee Dastuurka ,laguna qeybsado 18-Gobol ee jira ,ciddii xaq ka maqnaaneyso waa la arkayaa.

Xildh. Cali Ganey ,wuxuu soo jeediyey in 5-tan qodob loo codeeyo ,qodobka 2-aad oo dooda ka taagantahayna dib loo dhigo.

Xildh.Cusmaan Xaaji ,wuxuu sheegay in mashruuc sharci laga hadlaayo oo ah sidii loo taabagelin lahaa doorashada dadban . 54-ta Aqlaka Sare gobolka Banaadir kuma jiro ,waxaa ku nool 2-Million oo qof. Qodobkaan ah Aqalka Sare mashruuc ma gelikaro.wuxuu soo jeediyey in matalaada laga dhigo 18x3 Mashruuca 6-da qodob ka kooban ,waxaa concern laga qabaa qod.2-aad ,wuxuu soo jeediyey oo kale in laga dhigo 5 -Mashruuc ,kadibna la ansaxiyo .

Xildh.Cusmaan Cilmi Boqore,wuxuu sheegay in aan jirin wax laysku diidan yahay ,wixii laga yeelayana guddoonka ayeey u taalaa.

Xildh.Cabdalla Boos Axmed ,wuxuu sheegay ilaa saaka in ay ku jireyn doorashada dadban, xildhibaan adana way ogolyihiin.wuxuu soo jeediyey in Qod.2-aad meesha laga saaro ,wuxuuna codsadey isagoo ku hadlaaya magaca iyo Afka Xildhibaanadda Baarlamanka in qod.2-aad laga saaro.

Xildh. C/lladhiif Muuse(Sanyare),wuxuu sheegay in maqaamka Muqdisho waxa looga hadliwaayey Aqalka Sare ,markii madasha shirka la fadhiyey maxaa looga hadli waayey.wuxuu soo jeediyey in qodobadda 5 (shanta) ah la ansaxiyo.

Xildh.Aadan Maxamed Cali ,wuxuu soo jeediyey in qod.2-aad laga saaro loona codeeyo ,kadibna lana ansaxiyo.

Xildh.Isaaq Maxamed, wuxuu sheegay in wixii laga hadlilahaa oo la soo jeedin lagaa oo dhan laga hadley . Wuxuu soo jeddiyey in qod.6-aad farq.1aad . in meesha laga saaro qod.2-aad ee doorashada dadban .

Xildh. Kulalihi. Wuxuu sheegay in arrinta maanta gacanteena ayey ku jirtaa ,haddi la ansinwaayo mas'uuliyadaas waxaa qaadanaaya Baarlamanka. Madax-weynaha wuxuu keenayaa tii kampala accord oo kale waxayna dhacaysaa markii la ansaxinwaayo 2-qodob. Hadda garoonka waxaa ku shiraaya Madax-weynaha , Madaxda dalka iyo Beesha Caalamka,waxaa meesha yaal heshiiskii madasha Shirka oo al ansaxiyey ,dib u dhac wuxuu ka imaanayaa 2-meelood,hana ku qasbina Madax-weynaha in uu Degree soo saaro ,3-beri ka dib.wuxuu soo jeediyey in xildhibaanada tolkoodi ay ku noqdaan,sharciga waa yaalaa,geba-gebo Madax-weynaha JFS la tixgeliyo.

Xildh. C/qaadir Sandheere, wuxuu sheegay in cagajugleynta Baarlamanka laga daayo,haddey Madaxda Sare iska celinwaayaan anagaa iska celineyno Beesha Caalamka.Warsan ha idiinka soo baxao dad ayaa halkaan na keenay.

Xildh. Cali Nuur Boodaaye,wuxuu sheegay in nin kasta sida beeshiisu ay tahay ayuu ka hadley. Waxaa aad u soo noqnoqdey qod.2-aad ,wuxuu soo jeediyey in heshiis laga galo. Shacabka siduu rabo wa sida uu rabo golaha Baarlamanka. Guddi ayaa la magacaabey oo ka kooban 25-xubnood heshiis (negotiantion hala sameeyo.

8.Guddoomiyaha Jawaari,wuxuu sheegay in go'aankii la gaaro la keenayo Baarlamanka ,haddii la samirana xal lagaari karo. Arrinta uu u yiri hala keeno Baarlamanka heshiiskii madasha waxay aheyd in la barto dhaqanka Demoqaraadiyadda.2004 si dastuuri iyo si demoqaraadi ,wuxuu soo jeediyey in dooda ay furantahay maalinta xigta.

Kalfadhiga 8-aad kulankiisa 11-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 04:40gd.

.